

Name Suad
26/08/10 at 01:02 AM
26/08/2010 at 01.02 AM
Wadanka? uk

suaal

asalamu calaykum jasakalahu kahay walaalaha manhajonline ilahay khayr
hadinka siyo sidaadaad nogu so gudbisaan cilmiigaa yo culimad salafka
suaal ayaan qabanaa gabdhaa muslimad ee donasaa inay cibasatoo 10
danbee ee ramadaan ma cuni kartaa kinninkaa dhiga lasgaagaa ilasho

Jawaab : **Waclaykumu salaam**

**Haweenta Muslimadda ahi, waa isticmaali kartaa daawada
joojinaysa dhiingga caadada, si'ay u soonta Ramadhaanka,
amaba u ictikaafto tobanka danbe, waxaase lagama
maarmaan ah, in arrintaas dhakhaatiirta lagu kal
soonyahay iyo dadka kale ee aqoonta u leh arrimaha
caafimaadka, ay u tilmaamaan haweentaas oo u caddeeyaan
in aan wax dhib ahi haba yaraatee, uga imaanayn
isticmaalka daawadaas, iyada oo ay u habboontahay inaanay
isticmaalin daawadaas, sababta oo ah, Allaah swt, iyaa
dhiingga ku qaddaray hablaha nabi aadam csw.**

**Mar su'aal arrintaas la xiriirta Culumada waaweeyn ee
sucuudiga la weydiiyey, waxa ay fatwoodeen in arrintaasi
bannaantahay, hadii aan wax dhib ah lagala kulmeeyn
isticmaalka daawadaas, waxa ayna yiraahdeen sidatan:**

السؤال

هل يجوز للمرأة استعمال دواء لمنع الحيض في رمضان أو لا؟
الإجابة

يجوز أن تستعمل المرأة أدوية في رمضان لمنع الحيض إذا قرر أهل الأمانة من الدكتور ومن في حكمهم أن ذلك لا يضرها، ولا يؤثر الخبرة حملها، وخير لها أن تكف عن ذلك، وقد جعل الله لها رخصة في على جهاز الحيض في رمضان، وشرع لها قضاء الأيام التي أفطرتها الفطر إذا جاءها ورضي لها بذلك دينا.

وبالله التوفيق وصلى الله على نبينا محمد وآلـه وصحبه وسلم
المفتى

فتاوی اللجنہ الدئما با السعوديه

Waxaa Soo Ururiyay Jawaabtan Walaalkeen Macalin Khaliif Cabdisamad
Xafidahullaah